# JIIFINTA ISBITAALKA SIDII LAGUU QIIMEEYO

(Qaybta 2 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qofta mas'uul ka ah xannaanadaada ("takhtarka mas'uul ka ah") | |
| 3. Magaca qaybta iyo isbitaalka | |

## Waa maxay sababta aan isbitaalka la ii jiifiyey?

Waxaa isbitaalkaan laguu keenay sida u qabo qaybta 2 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983. Waxaa ku baarey labo takhtar waxayna u maleeyaan inaad qabtid jirro maskaxeed iyo in lagaa rabo inaad isbitaalka joogtid sidii qofka mas'uul ka ah xannaanadaada (takhtarka mas'uul kaa ah) u ogaado jirradaada iyo sidii laguu caawiyo.

## Ilaa gormee ayaa halkaan joogi doonaa?

Waxaa halkaan lagugu hayn karaa ilaa 28 maalmood.

Xilligaan waa inaadan bixin aysan ahayn haddii takhtarka mas'uul kaa ah kuu fasaxo inaad baxdo mooyee. Haddii aad isku daydo inaad baxdo shaqaalaha ayaa ku joojin doono, markii aad baxdana, waa lagu soo qaban karaa iyo lagu soo celin karaa.

Haddii isbitaalka lagugu haayo sida u qabo qaybta 4 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda, markaas waqtiga aad isbitaalka ku jirtay waxuu qayb ka noqonaayaa 28da maalmood.

Xaaladdaada 28da maalmood waxay dhammaan doonaan:

| |
|---|
| Taariikhda: |

